Codso dugsiga xannaanadda iyo qoys-xannaanadeedka

Buuggani tilmaan-bixinta waxaa loogu talagalay qofka adigoo kale ah oo doonaayo in uu boos dugsiga xannaanadda ama qoys-xannaanadeedka degmada Norrköping ka codsado isagoo adeegsanaayo adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan.

Buugga tilmaan-bixinta wuxuu ku tilmaamayaa sida loo codsado adigoo aadan gelin goobta adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan.

Codsashada awgeed waxaad u baahan tahay, tobbanka lambar ee aqoonsiga [personnummer] ee dalka Iswiidan laga adeegsado iyo e-mail.

Adeegga farsamada elektroonikada ku salaysanen waxaad ka heleysaa shab-akadda internetka ee adreeskeeda yahay:
http://utb24fsk.norrkoping.se/

Boos ka dalbo dugsiga xannaanadda

Tallaabada 1-aad

Jag-sii afargeysta ay ku qoran tahay Codso dugsiga xannaanadda.



NORRKÖPING

Tallaabada 2-aad - Raadso dugsiga xannaanadda

Raadso dugsiga xannaanadda.



Siyaabo kala duwan ayaa u codsan kartaa.

- Waxaad ka raadsan kartaa goobta aad degan tahay.
- Waxaad ka raadsan kartaa dhaqdhaqyo kala duwan, Tusaale dugsiga xannaanadda ama qoys-xannaanadeedka.
- Waxaad ka raadsan kartaa oo keliya dugsiyada xannaanadda ee dowladda hoose ama kuwa gaar ahaanta loo leeyahay.
- Waxaad ka raadsan kartaa khariidad.
- Waxaad ka raadsan kartaa adigoo adeegsanaayo magaca dugsiga xannaanadda oo aad xiisaynayso.

Kaddib markii aad xulato jag-sii Raadi.

Haddii aad waxba raadsan waxaa soo ifbaxaayo dhammaan dugsiyda xannaanadda ee la heli karo.

NORRKÖPING

Tallaabada 3-aad - Xulo dugsiga xannaanadda

Xulashadaada waxay ka muuqan doontaa halka isla boggaas ugu hooseeyso.

Jag-sii Ku-dar sida aad xulato dugsiga xannaanadda. Waxaad xulan kartaa dhowr dugsi xannaanadood. Waxaad saf u geli kartaa ugu badnaantii 3 dugsi xannaanadeed.

Haddii aad warbixin dheeraad ku saabsan dugsiga ku muuqda waxaad jag-siisaa Ii tusi warbixin dheeraad ah

Waxaa soo ifbaxaayo afargeys markii aad jag-siiso Ii tusi warbixin dheeraad ah. Waxaa ku muuqan doono adreeska dugsiga xannaanadda.
Waxaa kaloo halkaan ka heli doontaa xiriiriyeha shabakadda internetka ee dugsiga xannaanadda www.norrkoping.se

Waxaad isha ku dhufan doontaa magaca qofka safka mas'uul ka ah ee dugsiga xannaanadda iyo sida qofkaas loola xiriiro.



NORRKÖPING

Tallaabada 4-aa – Bilaaw dalbashada

Kaddib markii aad xulato jag-sii badhanka Biloow dalbashada.

NORRKÖPING

Tallaabada 5-aad - Tobbanka lambar ee aqoonsiga

Halkaan ku qor tobbanka lambar ee aqoonsiga adiga ku gaarka ah iyo tobbanka lambar ee aqoonsiga ee ubadkaaga.
Waxaad kaloo ku qori kartaa tobbanka lambar ee aqoonsiga ee waalidka kale.

Waa inaad cunug kasta u diyaarisaa codsi isaga u gaar ah, waa haddii aad dhowr carruur leedahay.

Halkaan ku qor tobbanka lambar ee aqoonsiga.

Halkaan ku qor tobbanka lambar ee aqoonsiga ee ubadkaaga.

Halkaan ku qor tobbanka lambar ee aqoonsiga ee xilhaayeha xannaanadda/ waalidka kale haddii laba waalid aad tihiin.

Markii aad dhamayso jag-sii på Ku xiga.

NORRKÖPING

Tallaabada 6-aad – Warbixin-shaqsiyeedyada adiga ku gaarka ah

Halkaan ku qor warbixin-shaqsiyeed- kaaga/kiinna sida lambarrada taleefona-diina iyo e-mailkiinna.

Waa inaad leedahay e-mail. Wixii warbixin ah ku saabsan codsigaaga waxaa lagugu soo diri doonaa e-mail.



NORRKÖPING

Tallaabada 7-aad – Hab nidaamsan u kala dhig dugsiyada xannaanadda

Xulo dugsiga xannaanadda adigoo Jag-sii falaarta liiska kaaga muuqata.
Doorashada 1-aad ee dugsiga xannaanadda ee aad ubadkaaga la jeclan lahayd.
Waa inaad xulataa ugu yaraan hal dugsiga.
Waxaad saf u geli kartaa ugu badnaantii saddex dugsiyada.
Markii aad dhamayso jag-sii Ku xiga.



Jag-sii falaarta sida u kugu soo ifbaxo dugsiyada xannaanadda aad dooratay. **Xulo dugsiga xannaanadda ee ku habboon doorashadaada koowaad 1.**

Haddii aad dooratay dhowr dugsi waxaad ku meelaynta kartaa sida Beddelka 2 iyo 3. U habeey dugsiyada xannaanaddana habka aad doonayso.

Markii aad dhamayso jag-sii på Ku xiga.

NORRKÖPING

Tallaabada 8-aad - Warbixin ku saabsan meelaynta

Qor taariikhda aad doonayso in ubadkaaga u dugsiga xannaanadda bilaabo.
Waa inaad sheegtaa sababta aad u doonayso booska dugsiga xannaanadda .
Ka xulo hoosta liiska falaarta Nooca meelaynta.

Waa inaad na wargelisaa luqada u qoysku ku hadlo. (Afka hooyo ee cunugga)



NORRKÖPING

Tallaabada 9-aad - Warbixinta ku meelaynta – Su'aalaha kale

Ma jiray ubadka walaalahiisa oo lagu xannaanadeeyo dugsiga xannaanadda ama qoys-xannaanadeedka?
Falaarta liiska ku qor Haa ama Maya.

Goor dhow miyaa degmada Norrköping u soo guurtay? Afargeysta ku qor adreeska cusub ee aad degmada Norrköping ku leedahay. Qor taariikhda aad degmada u soo guurtay.

Jag-sii Ku xiga.

Jag-sii falaarta.
Calamadeey Haa haddii ubadkaaga walaalahiisa lagu xannaanadeeyo dugsiyada xannaanadda ee degmada Norrköping.
Calamadeey Maya haddii ubadkaaga walaalahiisa aan lagu xannaanadayn dugsiyada xannaanadda ee degmada Norrköping.

Halkaan ku qor adreeskaaga cusub waa haddii aad dhowaan degmada Norrköping u soo guurtay. Qor taariikhda aad u soo guurtay.

Markii aad dhamayso jag-sii på Ku xiga.

NORRKÖPING

Tallaabada 10 – Xaqiiji codsiga

Aqriso kaddib hubso in wax kasta u sax yahay. Haddii aad jag-siiso qalinka ayaa wax ka beddeli kartaa.

Kaddib markii aad hubsato in wax kasta ay sax yihiin jag-sii sida aad codsiga ku xaqiiso awgeed, halka bogga ugu hooseysaa.



NORRKÖPING

Tallaabada 11-add – Codsiga waa la diray

E-mail ayaa lagu soo diri doonaa kaasoo lagugu wargelinaayo in codsiga laga guddoomay.

Haddii aad leedahay kaarka aqoonsiga ee loo yaqaanno e-legitimation waxaad geli kartaa Bogga adiga ku gaar ah kaddib halkaas ayaa arrintaada kala socon kartaa.

NORRKÖPING